IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

# FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 1 Nof. 78 — L. 11

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

**FAAFINTA BIL SOO BAXA** — جريدة شهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar walba** — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudaheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 42 ee Okt. 78, Xoojnta Afka Carabiga iyo wax ka badalid Sharciga Waxbarashada. Bogga 710

SHARCI L. 43 ee 1 Nof. 78, wax ka badalid Sharci lam. 15 ee 25ka Jennaayo 1969. Sharciga badbaadada Ugaarta iyo Dhirta. » 713

### QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWAYNAHA JDS, L. 77 ee 15 Okt. 78, Magacaabid ku meel gaarka ah (Reggente) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Max. Bad. Dalka » 715

XEER MADAXWAYNAHA JDS, L. 78 ee 15 Okt. 78, Ka noqosho Beddel. » 716

XEER MADAXWAYNAHA JDS, L. 79 ee 15 Okt. 78, Ka noqosho Beddel. » 717

XEER WASAARADDA H. GUUD, L. 80 ee 17 Okt. 78, Habka Qaybinta gunnada gaarka ah ee hawlaha Injiyeeradda Wakaaladdda Hindisaha Soomaaliyeed. Bogga 718

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 81 ee 6 Maajo 78, Dhul Dowladeed gatay gacantana loo geliyaya (Libra Disponibilita') Jaalleyaasha Maxamed Jaamac Axmed iyo Cabdi Xaaji Faarax Maxamed ku yaal Kismaayo kuna fadhiya mq. 321. » 723

## QAYBTA SEDDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Saciid Maxamed Cabdulle L. 601 Bogga 725

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdiraxmaan X. Daahir L. 602

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdikariin Canshuur Cabadalla L. 603 » 726

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Aadan Maxamed L. 604

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaallle Xasan Maxamed Cumar L. 605 » 727

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cismaan Yuusuf Cabdullaahi L. 606

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdi Aamin Cali L. 607 » 728

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Xuseen Kooshin L. 608

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cabdi Xaaji Yuusuf L. 609 » 729

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Cabdi Cabdullaahi L. 610

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Suleymaan Cali Nuur L. 611 » 730

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Shariif Cumar Maxamed L. 612

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Cibaada Maxamed Maxamuud L. 613 » 731

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22.7.78, Naado Dhul Jaalle Dr. Muuse Maxamed Cabdikariin L. 614

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 2.8.78 Bed. Naado Dhul Jaalle Sha; Axmed Xasan Cabdulle Cabdi Daahir Axmed iyo Cabdisalaam Axmed L. 615 » 732

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 1.11.78 Lumid jeeg wareega L. 062917 ku qoran Sh.So. 4.000, ay leedahay Canab Xuseen Weyal » 733

MAXKAMADDA GOBALKA HARAGEYSA, 30.10.78 Lumid Jeeg wareega L. 698151 ku qoran Sh.So. 4.500 u leeyahay Cabdi Xasan Cali L. 615/Bis L. 616/Bis

Qodobka 4aad

**XEERKABE**

1. Wasiirka Wasaaradda Tacliinta Sare wuxuu soo saari karaa xeer-kaabe oo faahfaafin ka bixinaya habka ugu wacan oo loogu dhaqan gelinaayo sharciga Jaamacadda Ummadda.

2 Wasiirka Wasaaradda Waxbaashada iyo Barbaarinta isna wuxuu soo saari karaa xeer-kaab oo faahfaahin ka bixinaya habka iyo barnaamijka loogu talo gali doono dhaqan-galka sharcigan inta ku saabsan Dugsiyada Hoose, dhexe iyo Sare iyo Machadka Macallimiinta.

Qodobka 5aad

1. Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa sannadka Waxbarashada ee 1977/1978
2. Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Dowadda

Muqdisho 31 Oktoobar 1978

Madaxweynaha J.D.S.
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 43 ee 1 Nofembar 78, Wax ka beddelid sharci lamb. 15 ee 25ka Jennaayo 1969; sharciga badbaadada Ugaarta iyo Dhirta.

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad, tan 2aad iya tan 3aad

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. 15 ee soo baxay 25kii Jennaayo 1969 iyo sharciga lambarkiisun yahay 68 ee 31ka

MARKII LA TIXGELIYAY: inay lagama maarmaan tahay in la nabad geliyo ugaarta iyo bahalada Waddanka ku nool oo Dhaqaalaha Dalka qiimo wayn ugu fadhiya;

MARKUU ARKAY: In loo baahan yahay in dib loo habeeyo shaciga ugaarta iyo Dhirta ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY : Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ;

**WUXUU SOO SAARAY**

*Sharciga* **Soo** *Socda*:

Qodobka 1aad

Iyadoo Sharciga lamb. 15 ee 25ka Jennaayo 1969 uu sidiisii u taagan yahay, dilka Ugaarta iyo bahalada ku xusan Qodobka 2aad iyo Qod. 3aad ee soo socda iyo haysashada wixii ka yimaada naflaydaas waxaa lagu dhaqayaa shacigan.

Qodobka 2aad

Qof kasta oo si sharc darro ah u dila maroodi, Wiyil, lo'gesi Shabeel, Muqshabeel, haramcad dameer farow, geri iyo Jeer ama lagu helo asagoo si sharci darroah ku haysta ilko, harag, gees, ama wixii kaloo ka yimaada naflaydaas waxaa lagu ciqaabayaa shan (5) sano ilaa toban (10) sano oo xarig ah, iyo Shs. 10.000 (tobankun) ilaa 20.000 (labaatankun) oo ganaax ah

Qodobka 3aad

Qof kasta oo si sharci darro ah ku dila: dabataag, Biciid, gacdir, dameer dibadeed, cawl ama gata ama lagu helo asagoo si sharci darro ah ku haysta harag, gees ama wax kastoo ka yimaada Ugaataas, waxaa lagu Ciqaabayaa 2 (laba) sano ilaa 5 (shan) sano oo xarig ah, ama Shs. 3.000 (saddexkun) ilaa Shs. 15.000 (shaniyotobankunn) oo ganaax ah ama labada oo laysugu daro.

Qodobka 4aad

Ciqaabta ku xusan Qodobka 2aad iyo Qodobka 3aad ee Sharcign waxaa lagu kordhinayaa seddex u dhig meel ilaa seddex u dhig laba meelood (da un terzo a due terzi) haddii:

1. Danbiga ay wada galeen seddex qof iyo wixii ka badan;

2. Ugaarta lagu laayo xirmooyinka ugaarta dhexdooda;

3. dadka danbiga lagu helay ay ka hortagaan ama u hogaan.

sami waayaan Ciidamada Nabadgelyada ama Ciiamada ugaarta ilaaliya;

4. waxaa ugaarta ka yimid ee lagu qabtay qiimahoodu ka badan yahay Shs. 20.000 (labaatankun).

Qodobka 5aad

Qofkii asagoo ugaarsanaya, gala denmbi ka weyn ama ka duwan kuwa sharciganu sheegayo, waxaa lala aadayaa xeerarka kale ee Ciqaabta.

Qodobka 6aad

Sharcigani wuxuu la soconayaa mabaadii'da guud ee ku xusan Buugga 1aad ee xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Qodobka 7aad

Dambiyada sharcigaan laga galo waxaa awood qaadistooda leh Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laamaha Gobollada.

Qodobka 8aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama la socon karin shargaan waa la baa'biyay.

Qodobka 9aad

1. Shaciganu wuxuu dhaqan galyaa 15 maalmood ka dib marka la saxiixo, waxaana lagu daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

2. Cid kasta waxaa waajib ku ah inuu dhawro Sharcigaan, u fuliyana sida sharciyada Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 1 Nofember 1978

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Madaxwaynaha J.D.S.

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 77 ee Okt. 1978, Magacaabid ku meel gaarka ah (Reggente) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka.

### MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad, iyo 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO CUSKADAY: Sharciyada L. 17,18,19 ee 1da Luulyo 1976 oo soomaynayaan in Maamulka Guud ee Dowladda la Wareegay XisBiga H.K.S. lalana Akhriyo Sharci L. 3 ee 10kii Jannaayo 1970 iyo Beddelaaddii ka dambeeysay ee ku saabsan Dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Xeer Ilaalinta Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka;

ISAGOO GARTAY: In ay lagama maarmaan tahay in la Magacaabo si ku meel gaar ah (Reggente) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka, Maadaama kan hore ku Magacaawnaa uu meesha ka maqan yahay;

### WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

**eiiyahE**

Waxaa la Magacaabay inuu ku meel Gaarka (Reggente) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka Soomaaliyeed, Jaalle G/le Sare Dr. Cusmaan Maye Macalin, oo ka tirsan Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta la saxiixo waxaana lagu faafinayaa Xaashida Rasmiga ah (Bollettino Ufficiale) ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed.

Muqdisho 15 Okt. 1978

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
Madaxwaynaha J.D.S.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
Diiwaanka Lamb. 5 Bogga Lamb. 177
Ku Xigeenka Hantidhowrka Guud

XEER MADAXWAYNAHA J.D.S. L. 78, ee 15 Okt. 78, Ka noqosho Beddel.

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY: Warqaddii 1aad tii 2aad iyo tii 3aad ee Kacaankii 21 Oktoobar

MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 17,18 iyo 19 ee soo baxay 1.4.70 iyo Beddeaaddii ka dambeeysay (Sharciga Shaqaalaha Dawladda).

MARKUU ARKAY: Xeer L. yahay 18 ee 29.1.1976 oo lagu dhisay xafiiska Garyaqaanka Guud ee Doladda.

MARKUU ARKAY: Go'aankii uu gaaray Madaxweyne ku xigeenka J.D.S. ahna Kaaliyaha Madaxwaynaha Arrimaha Maamulka Dawladda.

Qoobka 1aad

In Jaalle Cabduraxmaan Sheekh Nuur oo ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda laga noqday beddelkii uu u joogay Bankiga Horumarinta Soomaalida, waxaana lagartay inuu ku soo noqdo Xarunta Xafiiska Garyaqnaaka Guud.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla markuu uu saxiixo Madaxweysaha J.D.Sii waxaana lagu soo saari doonaa Faatinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Oktoobar 1978

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 79 ee 15 Okt. 1978, Ka noqosho Beddel.-

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY : Warqaddii koowaad, tii labaad iyo tii saddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969.

MARKUU ARKAY : Qodobbada kala ah 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1.7.1979.

MARKUU ARKAY : Sharciga L. yahay 29 ee soo baxay 1.4.7 iyo beddelaaddii ka dambeeyay (Sharciga Shaqaalaha Dawladda).

MARKUU ARKAY : Xeerka L. yahay 18 ee 291.1976 oo lagu dhisay Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

MARKUU ARKAY : Go'aankii uu gaaray Madaxweyne Ku Xigeenka J.D.S. ahna Kaaliyaha Madaxweysaha Arrimaha Maamulka Dawladda.

WUXUU XEERAYAA :

Qodobka 1aad

In Jaalle ILIYAAS XAAJI MAXAMUUD oo ka tirsan

fiihka Garyaqnka Guud ee Dawladda laga noqday beddelkii uu u joogay Wasaaradda Hawlaha Guud, waxaana la gartay inuu ku soo noqdo Xarunta Xafiiska Garyaqaanka Guud.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Oktoobar 1978

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 80 ee 17 Okt. 78 Habka Qaybinta gunnada gaarka ah ee Howlaha Injiyee-riyadda Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed.-

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY : Xaanshada 1aad, 2aad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga 1.14 ee 3 Juunyo 1962 iyo bedde-laadii ka dambeeyay kuna saabsanaa Habka Maafulka Guud ee Dawladda ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga 1.28 ee 16.6.1978 ee Dhismaha Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed iyo xeerka tir. ya-hay 62 ee 25 Maajo 1978 oo ku saabsan Nidaamka Khid-madda ee Wakaaladda ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga tir. yahay 37 ee 3 Oktoobar 1977 ee Gunnada Gaarka ah oo ay yeelanyaan Farsamayaqaan-nada ka qayb qaata fulinta howlaha Injeyeeriyadda ee Wakaaladdu qabato ;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in la habeeya lana xeereeya habka qaybinta gunnada qay-binta gunnada gaarka ah ee la siinaayo Kooxda Farsamo-yaqaannada ka qayb qaata howlaha Injiyeeriyadda oo ay Wakaaladdu qabato ;

ISAGOO TIXGELINAAYA : Talada u soo jeediyay Maaree-yahay Guud ee Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed.

WUXUU XEERAYAA :

### Qodobka 1aad

Gunnada gaarka ah oo ku tilmaaman Sharciga tirsigiisu yahay 37 ee 3 Oktoobar 1977 waxaa yeelanayaa kaaliye qofka farsamayaqaanka ah iyo shaqaalaha kalee oo si buuxda ah uga qayb qaata fulinta howlaha Injiyeeriyadda oo Wakaalad-du qabato uguna timaada dakhli sida u qoraaye Xeerka Ma-daxweynaha 1.62 ee 25 Maajo 1978 kuna saabsan Nidaamka Khidmadda ee Wakaaladda.-

### Qodobka 2aad

Inta lacag ahaan oo qofka yeelanaayo gunnada gaarka ah ee kor lagu soo xusay, waxay ku xirnaanaysaa fulinta shuruu-daha socda :

ii — Inta ay la egtahay howsha u qabtay iyo nooca nowsha oo qofka qabtay.-

Qodobka 3aad

Habka qaybinta gunnada gaarka ah oo lagu soo tilmaamay Sharciga 1. 37 ee 3 Oktoobar 1977 iyo xeerkan, waa sida ku lifaaqan isla xeerkan, waxaana loo aqoonsanayaa Lifaaqa «A». — oo koobaya seddex warqadood.-

Qodobka 4aad

Maareeyahay Guud ee Wakaaladda isagoo tixgeelinaaya Xeerkan iyo talada u soo jeediyo Maareeyaha Waaxda ay Fulinayso Howlaha Injiyeeriyadda wuxuu ka talinayaa qiimeynta shaqada qof kasta qabtay iyo inta lacag ahaan qof kasta qabtay iyo inta lacag ahaan of kasta ku yeelanaayo gunnadaas.

Gunnadaas gaarka ah waxaa la bixinayaa seddexdii bilood mar, ama wax ka yar muddadaas haddii uu Maareeyaha Guud ee Wakaaladdu ay la noqoto in ay jiraan dakhli oo mudan qaybinteeda.-

Qodobka 5aad

Gunnada gaarka ah waxaa kalee la siin karaa farsamoyaqaanno kale iyo shaqaale kale oo ka qayb qaata fulinta howlaha Injiyeeriyadda oo Wakaaladdu qabato oo aan ka tirsanayn Wakaaladdu haddii ay Wakaaladdu u baahato shaqadooda.-

Qodobka 6aad

Gunnada gaarka ah ee xeerkan lagu soo sheegay waxaa dulsaaran canshuurta bollada.-

Qodobka 7aad

Xeerkan wuxuu la dhaqan galayaa Sharciga 1. 37 e 3 Oktoobar 1977 oo lagu dhisay Gunnada gaarka ah.-

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.-

Muqdisho, 17 Okt. 1978

WASIIRKA

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## PROGETTI EDILI TIPO A

| | |
|---|---|
| I - Progetto Architettonico | 36% |
| 1 - Progettisti | 16% |
| 2 - Disegnatori | 17% |
| 3 - Topografi | 3% |
| II - Progetto Struttuhe | 26% |
| 1 - Progettisti | 15% |
| 2 - Disegnatori | 9% |
| 3 - Laboratoristi | 2% |
| III - Progetto Impianto Elettrico | 8% |
| 1 - Progettisti | 4,8% |
| 2 - Disegnatori | 3,2% |
| IV - Progetto Impianto Idrico | 5% |
| 1 - Progettisti | 3% |
| 2 - Disegnatori | 2% |
| V - Preparazione Documenti | 25% |
| 1 - Computisti | 7% |
| 2 - Preparatore dei Capitolati | 2,5% |
| 3 - Dattilografi | 4% |
| 4 - Personale Ausiliario | 10% |
| 5 - Spese Vari | 1,5% |

## PROGETTI EDILI TIPO B

| | |
|---|---|
| I - Progetto Architettonico | 26% |
| 1 - Progettisti | 14% |
| 2 - Disegnatori | 9% |

| | |
|---|---|
| II - Progetto Strutture | 36% |
| 1 - Progettisti | 16% |
| 2 - Disegnatori | 17% |
| 3 - Topografi | 3% |
| II - Progetto Strutture | 36% |
| 1 - Progettisti | 16% |
| 2 - Disegnatori | 17% |
| 3 - Topografi | 3% |
| III - Progetto Impianto Elettrico | 8% |
| 1 - Progettisti | 4,8% |
| 2 - Disegnatori | 3,2% |
| IV - Progetto Impianto Idrico | 5% |
| 1 - Progettisti | 3% |
| 2 - Disegnatori | 2% |
| V - Preparazione Documenti | 25% |
| 1 - Computisti | 7% |
| 2 - Preparatore dei Capitolati | 2,5% |
| 3 - Dattilografi | 4% |
| 4 - Personale Ausiliario | 10% |
| 5 - Spese Vari | 1,5% |

## PROGETTI INFRASTRUTTURE

| | |
|---|---|
| I - Rilievo Topografico | 26% |
| 1 - Topografo | 26% |
| 2 - Disegnatori | 16% |
| II - Rilievo Geotecnico | 12% |

| | |
|---|---|
| 1 - Geotecnico | 8% |
| 2 - Laboratoristi | 4% |
| III - Progetti Infrastrutture | 23% |
| 1 - Progettisti | 15% |
| 2 - Disegnatori | 8% |
| IV - Progeettò Strutture | 16% |
| 1 - Progettisti | 10% |
| 2 - Disegnatori | 6% |
| V - Preeparazione Documenti | 25% |
| 1 - Computisti | 7% |
| 2 - Preparazione Capitolati | 2,5% |
| 3 - Dattilografi | 4% |
| 4 - Personale Ausiliario | 10% |
| 5 - Spese varie | 1,5% |

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUR L. 81 ee 6 Maajo 78, Dhul Dowladeed gateen, gacantana loo geliyey (Libera Disponibilità) Jaalleyaasha MAXAMED JAAMAC AXMED iyo CABDI XAAJI FAARAX MAXAMED ku yaal Kisimaayo kuna fadhiya mq. 321.-

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ISAGOO ARKAY : Warqaddii Koowaad, labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed ;

ISAGOO ARKAY : Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Seebteembar 1973 ;

ISAGOO ARKAY : Xeer Dowladeed lamb. 291 Rep. taariikhda markay ahayd 11 Sebt. 1968, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah J.D.S. N. 7 al N. 12 ee 30.12.1968, taas oo lagu siiyeey Jaalle MAXAMED CABDALLA CISMAACIIL cad dhul ah ujeeddadiisu tahay dhis kuna fadhiya mq. 743/- kuna yaal Kisimaayo ;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda, taariikhdeeduna ahayd 3.7.1968, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga W.H.G. Waaxda W.H.G. Waaxda Farsamada dhulka ee Xamar kana ahaa Guddoomiye Inj. Abuukar Maxamed ;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijintii Farsamada ka tirsan W.H.G. ee Gobolka Kisimaayo, taariikhdeeduna ahayd 11.3.78 soo qoray Agaasimaha Hawlaha Guud Jaalle AADEN MAXAMED QAALIB taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaatay Laanta Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud ee Xamar, laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsantahay, kuna fadhiya mq. 321 ;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Kisimaayo laguna siiyey xaashida lamb eber taariikhdeeduna ahayd 1.9.1977 oo siisay Xafiiska Caafimaadka Guud Gobolka Jubbada Hoose oo caddeyneysa in guriga lagu noolaankaro ;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (Atto) lamb. 1232 Reb. taariikh-deeduna ahayd 6.8.1968 lagu diiwaan geliyey Xamar 11.8.1968, al n. 582 Atti Pubblici Vol. 18 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali, taas oo MAXAMED CABDALLA CISMAACIIL ka gaday kuna wareejiyey MAXAMED JAAMAC AXMED iyo CABDI FAARAX MAXAMED wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismahii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 321/- kuna Yaal Kisimaayo.

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsanaa siismada iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaal Kisimaayo oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis wuxuu soo saarayaa ;

## X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday MAXAMED JAAMAC AXMED iyo CABDI XAAJI FAARAX MAXAMED, dhul ku fadhiya mq. 321/- kuna yaal Kisimaayo.-

Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :-
Waqooyi waxaa ka xiga : dhismaha Wasaaradda Boosaha & Isgaarsiinta.

Koofur waxaa ka xiga : guri uu iska leeyahay Jaalle Maxamed Cabdalla Ismaaciil.

Galbeed waxaa ka xiga : guri uu lahaa Ex Rosi Francesco.

Bari waxaa ka xiga : Waddo.-
Muqdisho, 6 Maajo 1978.-

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Inj. Maxamed Xawaadle Madar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 21
Muqdisho, 14 Maajo 1978
Ku Simaha Hantidhowrka Guud

## QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO LA MID AH

### WAAXDA HAWLAHA DUUD
### WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
### —NAADO DHUL—

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sacdiya Maxameed Cabdallaa ay soo qoratay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 22.3.78 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangolaare Addimihiisuna yihiin 30X20 Kuna fadhiya 600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 72 B.
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 70 B
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 74 B.

Qofkii daneynayaa dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu qoray Buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalnaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 601

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
### NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdiraxmaan X. Daahir uu soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 28.5.78 uu ku weeydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangolaare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mq. z

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam. 100 B
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 97 B.
Bari waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalnaynta

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD
## WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdikariin Canshuur uu soo qortay Arji Waada Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maa-linii taariikhdu ahayd 28.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul dhiya Dowladeed oo ku yaal Xamar, Degmada Kaaraan Qaab-kiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 95 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 94 B.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 98 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki ka-raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maal-mood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

—AGAASIMAHA WAAXDA SH. DEG. MAGAALAYNTA—
INJ. CABDIKARIIN C. GUULEED

L. 603

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD
## WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA
## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Aadan Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 9.1.78 uuku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaa-raan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdm.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 81 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa —a xiga: Dhul lam.80 B.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 84 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki ka-raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maal-mood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & MAGAALAYNTA.
INJ. Cabdikariim C. Guuleed

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa lacaddeynayaa in Jaalle Xasan Maxameed Cumar uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 3.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Adimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 79 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 78 B.
Bari waxaa xa xiga : Dhul am. 82/B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 605

WAAXDA HAWLAHA DUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
—NAADO DHUL—

Waxaa la caddynaaa in Jaalle Cismaan Yuusuf Cabdullaahi uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 8.12.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaaladatan Xamar Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 17 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 16 B.
B a r i waxaa ka xiga: 20 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 606

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD
## WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Aamin Cali uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalin-tii taariikhdu ahayd 12.12.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dow-ladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Adimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 43 B.
Koofur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 42 B.
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 46 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki ka-raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maal-mood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 607

## WAAXDA HAWLAHA DUUD
## WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
## —NAADO DHUL—

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmeed Xuseen Kooshin uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 28.12.77 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Addimihiisuna yi-hiin 20X3 0kuna fadhiya 60 mq.

— SOODHIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 41 B
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 40 B
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 44 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki ka-raa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maal-mood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:
Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEGAANKA MAGAALAYNTA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Xaaji Yuusuf uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 3.5.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladtan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

— SOODHIMISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN —

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 609

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Cabdi Cabdullaahi uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, Maalintii taaiikhdu ahayd 28.5.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiiuna yihiin 20X40 kuna fadhiya1200 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 5 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Wadada Balcad
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 13 B. iyo 14 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 610

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Suleeybaan Cali Nuur uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 28.5.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Addimhiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 1200 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 12 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 6 B. iyo 7 B.
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 611

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shariif Cumar Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 16.6.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladata nXamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Addimihiisuna yihiin 60X40 kuna fadhiya 2.400 mq.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Wadad Balcad
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cibaada Maxamed Maxamuud uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 2.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Regtangolaare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 78 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 79 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 613

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**WAAXDA SAHANKA IYO DEGANKA MAGAALAYNTA**
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Dr. Muuse Maxameed Cabdikariin uu soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, maalintii taariikhdu ahayd 28.3.78 uu ku waydiistay gabal dhul Doladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Reegtangolaare Addimihiisuna yihiin 60X20 kuna fadhiya 1200 mq.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhunl lam. 97 B. iyo 99 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 96
B a r i waxaa ka xiga: Jid

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta, ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon bari ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

**BEDDELAAD NAADO DHUL**

Waxaa la caddenayaa i ndhulkii uu soo wadydiistay Jaalle SHA. Axmeed Xasan Cabdulle, Cabdi Daahir Axmed iyo Cabdisalaan Axmed maalintii 21.10.67 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore qaabkiisuna ahaa Afar Geesis-le ceg addimihiisuna ahaayeen 100X100 kuna fadhiya mq. 10.000 sababtoo ah Qorshaha dhulka oo is beddelay.

Sidaas aawgeed Naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1541/2381 ee Taar. 30.11.68 kana baxday xafiiskaan, waxay isu bedeeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaallayaashaas Qaabkiisu waa Regtangolaar Addimihiisuna yihiin 60X40 kuna fadhiya mq. 2.460

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 51-52 B.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a ri waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 22 Luulyo 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaalaynta
INJ. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 615

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDII ARKAY : dacwadda kor ku qoran ;
MARKUU ARKAY : waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga ;
HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L.9-9-65, 2; lumidda Jeegga wareega L. 062917 ay ku qoran tahay di Sh. So. 4.000, Bangiga Ganacsiga L. 3aad.

WUXUU AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Jeeg Wareega ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Jeega cusub ee a sameyn doono gacanta laga saaro Canab Xuseen Weyd ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudda 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegna .-

Muqdisho, 1-11-78.

GUDDOOM. MAX. GOBOLKA BANAADIR
(W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 615/Bis.

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA
Dekreeto Lamb. 12/78

Cabdi Xasan Cali . . . . . . . . . Dacwoode

Garsooruhu,

Haddii uu arkay Dacwadda kor ku xusan,
MARKUU ARKAY waxey ku saabsan tahay iyo Ogeysiinta Bangiga ;
HADDUU ARKAY : Qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2 lumidda Jeega War. Lamb. 698151 kuna taalo 4500/ Sh. kuna qoran Cabdi Xasan Cali.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Jeegga War. Lamb. 698151 ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Jeegga War. Lamb. 698151 cusub ee la sameyn doono gacasta laga saaro Cabdi Xasan Cali ama qof isla ka sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugayo 15ka maalmood ee aan kor ku soo sheegnay.

Hargeysa, 30.10.78

Guddoomiyaha Max. Gobolka Hargeysa
Yuusuf Xaaji Cabdi

L. 615/Bis.